# Aadista guriga marka laguugu duro cirbada xanuunka baabi'isa ee dhabarka laisaga duro (epidural) cirbada suuxinta ee laf dhabarta ka dib

## In dhibaatooyin aad u daran lagala kulmo cirbada xanuunka baabi'isa ee dhabarka (epidural) ama cirbada suuxinta ee laf dhabarta waa wax naadir ah.

**Si kastaba ha ahaatee, haddii aad leedahay mid ka mid ah calaamadaha soo socda, ula xiriir isbitaalka sida ugu dhakhsaha badan.**

### Madax-xanuun

Waxaa jira sababo badan uu uu madaxa kuu xanuuni karo, laakiin inta badan madax-xanuunka wuxuu ku reystaa nasiinada, iyo in biyo la cabo, iyo in xanuun baabi'iye fudud sida paracetamol la qaato Waydii kalkaalisadaada ama umulisadaada haddii aad u baahan tahay xanuun baabi'iye.

La xiriir isbitaalka haddii:

- uu madax xanuunkaaga reysan waayo markaad nasato kabacdi, ama aad biyo cabto, ama aad xanuun baabi'iye fudud qaadatid
- uu madax xanuunkaaga kasii daro markaad fadhiso ama aad istaagto laakiin aad roontahay markaad jiifato
- aad leedahay xanuuno kale, sida qoorta oo ku adkaata, isbedel dhanka maqalka ah (dhagaha ay shanqar kaa yeereyso ama ay ku xiran yihiin), indhaha aad cilad dhibaato ka qabto (iftiinka u uku dhibayo) qandho, ama aad qarqaryo dareemayso.

### Dhabar-xanuun

Waa wax badanaa dhaca in aad dhabarka dambe ee meesha lagaa qalay aad ka dareento debacsanaan ama barar. Tan waxay sii socon kartaa ilaa isbuuc balse maaha inay wax saameyn ah ku yeelato howl-maalmeedkaaga caadiga ah. Waxaad qaadan kartaa xanuun baabi'iye fudud hadii loo baahdo.

Cirbada suuxinta ee dhabarka ama epidural-ka ma dhaliso xanuunka dhabarka ah oo muddo dheer soconaya.

La xiriir isbitaalka haddii aad isku aragto mid ka mid ah waxyaabaha soo socda:

- dhabar-xanuun cusub ama mid kasii daraya, tusaale, xanuun kusii faafaya dhabarka ama qeybaha hoose ee jirka iyo lugaha.
- meesha cirbada lagaaga duray oo ku gaduudatay, barartay, ama uu dheecaan ka socdo
- haddii aad qandho leedahay ama aad qarqaryo dareemayso

### Haddii uu isbeddel ku yimid dareemaha qaybaha hoose ee jirkaaga

Waa wax caadi ah in meelo ka mid ah jirkaaga aad ka dareento kabuubyo dhalmada ka dib. Sababta ay taasi badanaa u dhacdo ayaa waxay tahay in ilmuhu uu cadaadis saaro neerfaha miskahaaga xilliga foosha iyo dhalmada. Marmar dhif ah waxaa dhacda, in cirbada suuxinta ay keeni karto kabuubyo, laakiin badanaa waxay kabuubyadaas meesha uga baxdaa toddobaadyo gudahood.

La xidhiidh cisbitaalka haddii aad dareento isbeddel muddo sii socda ama cusub oo ku yimaadda dabadaada ama lugahaaga sida:

- daciifnimo
- kabuubyo
- sidii in mudac laguugu mudayo oo kale marka ay meel ku kabuubyooto.

### Wixii talooyin iyo macluumaad intaas ka badan ah

**Adeegga Xanuunka Ba'an, Isbitaalka Haweenka ee Royal**

Isniinta ilaa Jimcaha 8.00 subaxnimo ilaa 4.00 galabnimo
Taleefanka: (03) 8345 2389

Haddii uusan qofna ka jawaabin, fadlan fariin cod ah noo reeb.

Haddii aan kugu soo celin weyno 4 saacadood gudahood, wac nambarka saacadaha dambe la wici karo ee hoos ku xusan oo weydii diiwanhayaha wax suuxiya ee lala hadli karo.
Taleefanka: (03) 8345 2000

### Ma u baahan tahay turjubaan?

Waad codsan kartaa turjubaan haddii aad u baahan tahay turjubaan.

### Taageerada Rabshadaha Qoyska

**1800 Respect National Helpline (Xushmada Khadka Caawinta Qaranka)**

Waxaad heli kartaa caawimo haddii aad la kulantay xadgudub galmo, rabshad guri ama qoys iyo xadgudub.
Waxaad wici kartaa xilli kasta oo habeen iyo maalinba ah.
1800 737 732 1800respect.org.au

**Cudurdaar:** Xaashidan xaqiiqda waxa ku qoran waa macluumaad guud oo keliya. Wixii talooyin adiga kuu gaar ah ee ku saabsan baahiyahaaga daryeelka caafimaadka ama tan ilmahaaga, waa inaad talo ka raadsataa dhakhtarkaaga. Royal Women's Hospital masuul kama aha khasaare ama dhaawac ka dhasha ku tiirsanaanta aad ku tiirsan tahay xaashidan halkii aad kala kulmi lahayd dhakhtar. Haddii adiga ama ilmahaaga aad u baahan tihiin daryeel caafimaad oo degdeg ah, fadlan la xidhiidh waaxda gurmadka degdegga ah ee kuugu dhow.

© The Royal Women's Hospital 2025.